



Isaga oo hoos imaanaya maamule cusub, Ockley Green hore ayuu u soo socdaa

Iyada oo qof soo booqday u kaxaysay xafiiskeeda , Kristina Howard ayaa sheegtay in ay cudurdaar ka bixinayso sanduuqyada iyo boorsooyinka iyo darbiyada maran. “Xaqiiqdii ma haysan wakhti aan wax ku furfuro ama wax ku qurxiyo,” ayay sheegtay maamulaha Dugsiga Dhexe ee Ockley Green.

Waxyaboo kale ayaa qaatay wakhtigii Howard tan iyo markii ay bilowday shaqada Luulyo 1. Wakhti hore, waxay ku hawlaneyd kulamo badan oo dhegeysi oo ay la yeelatay macallimiin iyo shaqaale soo laabanaya si loo ururiyo xog iyo macluumaad. Waxay jawaab-celinta u isticmaashay dejinta nidaam ku saleysan tiknoolijiyada oo xubnaha shaqaalaha ahi ay rajeynayaan in uu dugsiga siin doonto xasillooni u saamaxi karta in ay tacliin ahaan noqdaan kuwo iftiimaya.

“Wax kasta halka hore ayaan ka soo bilaabaynaa,” ayay sheegtay Howard, oo Portland ugu timiday Kent, Wash., halkaasi oo ay ka ahayd maamulaha Dugsiyada Dadweynaha Madaxa bannaan ee Excel. “Carruurtu waa kuwo wanaagsan, iyaga oo shaqaalaha joogaa ay yihiin kuwo wanaagsan, qoysaskuna waa kuwo taageero leh. Waxay kaliya u baahan yihiin dad u tilmaama jihada saxda ah, taasina waa waxa aan rajeynayo in aan hadda sameyneyno.”

Ockley Green wuxuu ahaa dugsigii u horreeyay ee laga beddelo habka K-8 oo laga dhigo dugsi dhexe isaga oo qayb ka ah ku soo noqoshada Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ahaanshaha dugsiyo dhexe oo dhammeystiran. Dib u furitaankii Ockley Green ee 2016-17 wuxuu jidka u banneeyay furitaanka sanadkan ee Harriet Tubman iyo Roseway Heights in ay noqdaan dugsiyo dhexe.

Ka dib yeelashadii labo maamulo oo ku meel gaar ah, bulshada Ockley Green waxay ku faraxsan tahay in Howard ay ka go'an tahay in ay joogto dugsiga Waqooyiga Portland.

“Markii u horreysay ee aan la kulmay Kristina waxay sheegtay ‘Halkan waxaa joogayaa muddo dheer. Halkan ayaan joogayaa,’” ayuu sheegay Richard Littledyke, oo ah macallinka muusikada ee dugsiga. “Taasi waxay yareysay culays badan.”

Inkasta oo ay si weyn ugu tiirsan tahay xogta, hadana dhageysiga macallimiinta iyo shaqaaluhu waxay leeyihiiin qiime taasi la mid ah, ayuu sheegay Howard.

“Waxaan u baahnaa sheekoojin, waxaan u baahnaa in aan ogaado sababta,” ayay sheegtay.

Jawaab-celintu waxay u sheegtay Howard in ay u baahnayd in ay mudnaanteeda ka dhigto xasilloonida iyo ammaanka dugsiga. Waxay isticmaashay barnaanijka software-ka, Kickboard, kaasi oo u oggolaada macallimiinta iyo maamulayaasha in ay kormeeraan oo ay la socdaan hab-dhaqanka kaasi oo u dhow waqtiga dhabta ah. Istmalaal app-ka ku jira telefoonka iyo kambiyuutaradooda gacanta' laptops', macallimiintu waxay awoodaan in ay ku waxa loo yaqaan dhibco "on points" ku abaalmariyaan ardayda ama xataa fasalka oo dhan, kaasi oo loogu talagalay hab-dhaqanka wanaagsan ee tusaalaha u ah qiiimaha muhiimka ah ee dugsiga: daryeel, wada shaqeyn iyo kobac.

Ardaydu waxay awoodi doonaa in ay dhibcaha u isticmaalaan in ay wax kaga dalbadaan waxyaalo la xaraashayo oo uu dugsigu qaban doono saddexdii billoodba mar. Howard waxay qaadatay jawaab-celin ka socota ardayda taasi oo ku saabsan abaalmarinada ay jeelaan lahaayeen in ay arkaan, talooinkooda waxaa ka mid ahaa Bubble tea, Taco Bell, Starbucks, cunto dhaqameedka Maraykanka Madow 'soul food', qalabka wax lagu dhageysto 'ear buds' iyo tikidhada filimada. Waxaa sidoo kale jira qorshayaal lagu furayo tukaan dugsigu leeyahay halkaasi ay ardaydu isticmaali karaan dhibcahooda.

Nidaamku wuxuu sidoo kale macallimiinta u oggolaanayaa in ay codsadaan taageero degdeg ah, kaasi oo Howard iyo kooxdeeda dhanka hoggaaminta u oggolaanaya in ay u si degdeg ah jawaab u bixiyaan marka loo eego nidaamkii hore ee ku xirnaa wicitaanka telefoonka la wacayay xafiiska hore ama isticmaalka walkie-talkies.

Tiknoolajiyadu waxay Howard ka caawisay in ay abuurto khadad cad oo la raacayo oo loogu talagalay hab-dhaqanka, kaasi oo leh abaalmarin iyo cawaaqib xumo labada dhinacba. Taasi awgeed, tirada dhibcaha abaalmarin ahaanta loo bixiyay si joogta ayay u korodhay. Howard waxay sheegtay in uu furuhu ahaa fikradda ah gadashada 'buy-in' ee ay ka heshay macallimiinta, gaar ahaan kuwa soo laabanayo.

"Tani waan ku wada jirnaa dhammaanteed," ayay sheegtay Howard. "Waxaan kaliya u sheegay in uu sanadkani yahay mid ku saabsan dhanka kobaca, isla markaana qof kastaa tahay in uu sii wado in uu kobco, oo aan ku jiro naftaydu."

Khadadka cad ee la raacayo waxay ardayda ka caawiyeen in ay la jaanqaadaan nidaamka.

"Waxaan fasalka oo dhan abaalmarin uga dhigi karaa dhibco ay helayaan, aad ayayna u aamisan yihiin," ayuu sheegay Littledyke, oo ah macallinka muusikada. "Waxaan arki karaa isbedel degdeg ah sababta oo ah waxay raadinayaan waxyaalahaasi iyaga oo muujinayo hab-dhaqan wanaagsan si ay u helaan dhibcahaasi."

Howard waxay sheegtay in iyada iyo kooxdeeda – oo ay ka mid yihiin kaaliyayaasha maamulayaasha Regina Sackrider, Aaron Green-Mitchell iyo Joshua Zeller – ay leeyihii shaqo badan oo ka horreysa. Dadaalku wuxuu la mid yahay kii ay Howard ka sameysay dugsigii Excel, halkaasi ay noqotay in ay dib u dhisto shaqaale natijadoodu sarreyno. Marka la joogo Ockley Green, waxay mudnaanta siinaysaa in ay macallimiinteeda isku meel u wada jeedaan iyada la isku darayo fikradahooda.

"Shaqaaluhu waxay ahaayeen kuwo aad u wanaagsan isla markaana aad wax u aaminsan," ayay sheegtay. "Waxaanan codsanayaa kuwo badan oo iyaga ka mid ah."